| JDF 248 | # Hagaha Sheegashooyinka Yaryar |
|---|---|

## 1. Macluumaadka Aas Aasiga ah

- Kiisaska Sheegashooyinka yaryar waxaa loo isticmaalaa kiisaska ilaa $ 7,500 qiimaheedu yahay si loo soo celiyo lacag ama hanti, loo qabto ama loo jaro heshiis, ama u hoggaansamaan axdiga xayiraadaha.
- Waxaa laguu ogol yahay oo kaliya 2 Sheegashooyin oo Yaryar bishii, iyo ugu badnaan 18 sanadkii halkii degmo.
- Xadiga sharciga ah ee ribadu waa 8% oo libi laabanta sanadkii.
- Ka xaree degmada Eedeysanuhu uu degan yahay, ka shaqeeyo ama uu ku leeyahay hantida.
- Kuma jiraan wax dacwado xeerbeegti sheegashooyinka yaryar.
- Haddii aad ku guuleysato xukun waa in wixii laguu xukumay aad qaadato. Maxkamaddu taas kuuma sameyso adiga.
- Sharciga hagaya hannaankan waa Sharcida Dib U Eegista Lagu Sameeyay ee Colorado (CRS) qaybta (§) 13-6-403 iyo Xeerarka Colorado ee Nidaamka Sheegashooyinka Yaryar (Xeerarka 501 - 521).

**Sidoo kale waxaa ku jira Tilmaamahan:**


| | | |
|---|---|---|
| 2. | Tilmaame Tallaabo-Tallaabo ah | Bogga 2 |
| 3. | Khidmadaha | Bogga 6 |
| 4. | Liiska Foomamka | Bogga 6 |
| 5. | Macluumaadka ADA | Bogga 6 |
| 6. | Talo Sharci | Bogga 7 |
| 7. | Tibaaxaha Caamka ah | Bogga 7 |

## 2. Tilmaame Tallaabo-Tallaabo ah

### Tallaabada 1 - Bilow Dacwadda(Dhibbane)

a) Buuxi waraaqaha lagu bilaabo:

- ☐ JDF 250 –Ogeysiis, Sheegashooyinka, iyo Yeedhmada.

**Fiiro gaar ah:** Waxa caddaymo ah haku lifaaqin foomkan.

b) Foomamka u gee maxkamadda si aad u xarayso.

c) Bixi lacagta xareynta. Ka eeg Qaybta Khidmada wixii faahfaahin ah.

d) Karraaniga ayaa buuxin doona taariikhda dacwadda marka aad xarayso.

### Tallaabada 2 - U sheeg Eedeysanaha (Dhibbanaha)

Waa in aad ogeysiisaa Eedaysanayaasha ugu yaraan 15 maalmood ka hor Maxkamadeynta. Waxaad leedahay laba doorasho:

**Wargelinta Rasmiga ah | U Geyn Shakhsi Ahaaneed**

- ☐ U dhiibka foomka farriin-qaade.
  - Qofi waa in uu si rasmi ah ugu dhiibaa foomka Eedeysane kasta.
  - Sidoo kale ma noqon kartid qof buuxiya shaqada qaadista dokumentiyada.
  - La xiriir xafiiska Bilayska ee degmada uu Eedeysanuhu ku nool yahay ama ka shaqeeyo. Ama,
  - Shaqaalaysii farriin-qaade xirfadle ah.
- ☐ Farriin-qaadaha ayaa buuxiya qaybta Caddaynta Gaarsiinta ee foomka.
- ☐ Ka xaree Caddaynta Gaadhsiinta maxkamadda.

**Boosta la Xaqiijiyey ee Karaaniga**

**Fiiro gaar ah:** Tani maaha qaabka la doorbido oo dib u dhac ayuu keeni karaa.

U sheeg karaaniga inuu ku wargeliyo Eedeysanaha boosta la xaqiijiyay:

☐ Waxaad ku khasbanaan doontaa inaad bixiso qarashka boostada la xaqiijiyay marka aad xarayso.

☐ Haddii aysan shaqayn, waxaad isticmaali doontaa nidaamka u gaynta tooska ah.

## Qoraal ku saabsan U Gaynta Ganacsi ama Hay'ad Dawladeed

**Ganacsiga**

Haddii Eedeysahuhu yahay shirkad ganacsi, tag onleyn ahaan **www.sos.state.co.us**

a) Dooro qaybta ganacsiga si aad u ogaato qofka wakiilka diiwaangashan yahay. Waa inaad u gayso waraaqaha ruuxan.

b) Waxaa muhiim ah inaad ogaato sida ganacsiga Eedeysanaha ah uu u dhisan yahay. Tusaale ahaan, haddii ganacsigu yahay qof keliya ganacsi uu leedahay, shirkad, iwm. Xeerka 304 ee Xeerarka Maxkamadda Degmada ee Madaniga ah ee Colorado ayaa tilmaamaya sida gaarsiinta loo fulin karo iyada oo lagu saleynayo nooca ganacsiga macluumaadkan ayaana caawin doona qofka yaqaana xeerarka gaarsiinta markay u diraan JDF 250.

**Wixii ah Hay'ad Dawladeed**

Waxaa lagaaga baahan karaa inaad ku xarayso wargelin qoraal ah Xeer Ilaaliyaha Guud ama wakiil dawladeed oo kale, kahor inta aan loo xaraynin kiiskaaga Maxkamadda, sida uu dhigayo C.R.S. § 24-10- 109.

## Tallaabada 3 – Jawaabta (Eedeysanaha)

a) Buuxi qaybta Jawaabta (Qaybta 2 / Bogga 3) ee JDF 250 marka la gaaro ama ka hor taariikhda maxkamadda.

b) Bixi lacagta xareynta. Ka eeg Qaybta Khidmada wixii faahfaahin ah.

## Tallaabada 4 – Dhexdhexaadin (Labada Dhinacba)

Dhexdhexaadintu waxay noqon kartaa qaab wax ku ool ah oo lagu xaliyo murankaaga.

Dhexdhexaadinta, cid dhexdhexaad ah ayaa kala shaqaynaysa dhinacyada sidii meel sir ah ay ugu heshiin lahaayeen oo ay labada dhinacna u aqbali lahaayeen.

La xidhididh Xafiiska Xalinta Khilaafaadka si aad u qabsato balan ama dalbato dhexdhexaadin qiimo jaban.

www.coloradoodr.org

Tallaabada 5 - Natiijada Dhexdhexaadinta (Labada Dhinacba)

a) Haddii labada dhinac ay gaaraan tanaasul, xaree foomka:

☐ JDF 75 – Shuruudo.

**Fiiro gaar ah:** Labada dhinac waa inay foomka saxiixaan.

b) Haddii aan heshiis la gaarin in maxkamad la isku diyaariyo.

Tallaabada 6 - U diyaar garawga Maxkamada (Labada Dhinacba)

Uruuri macluumaadka aad u baahan doonto si aad doodaada u hor keento Xaakinka.

**Diyaari Cadayntaada**

a) Dhis Doodaada

Muuji meelaha muhiimka ah ee aad doonayso in aad ka hadasho. Markaa waxaad u baahan doontaa inaad ogaato dokumentiyada iyo cidda ka hadli karta xaqiiqooyinka taageeraya doodahaas.

b) Ururi dokumentiyada aad u baahan tahay si aad u taageerto doodahaaga. Calaamadi caddaymahaaga, hadii aad hayso wax ka badan hal. Hakuu habaysnaadaan.

Tusaaleyaasha caddaymo waxaa weeye dokumentiyo sida sawiro, shaxo, iyo risiidho.

c) Ka samee nuqulo caddaymahaaga. Waxaad u baahan doontaa mid ugu yaraan in aad Maxkamadda siisid, iyo mid aad siiso dhinaca kale.

Haddii ay Maxkamaddu nuqulada kuu sameyso, waxaa jiri doona lacag boggiiba lagaa qaadayo.

d) U diyaargarowga Markhaatiga

Oggow hadii aad u baahan tahay wax markhaatiyaal ah.

Waxaad ka codsan kartaa inuu ikhtiyaarkii ku yimaado maxkamada, ama waxaad dalban kartaa in Maxkamadda yeedhma u dirto markhaati aad dalbatay si uu u yimaado Maxkamadda.

Dib u eeg "JDF 79 - Tilmaamaha Yeedhmada Dacwadda" wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan yeedhmada.

Tallaabada 7 - Natiijada Maxkamadda (Labada Dhinacba)

a) Maxkamaddu waxay inta badan go'aamin doontaa xaqiiqooyinka, cidda ku guulaysatay, iyo cadadda xukunka. Waxay sidoo kale u celin karaan kharashaadka (khidmadda xaraynta, lacagta gaarsiinta, iyo kharashka markhaatiga, haddii ay ku munaasab tahay) kooxda ku guuleystay.

b) Dhinaca loo xukumay ayaa ka masuul ah ururinta lacagtaas. **Maxkamaddu kuuma samaynayso taas.**

c) Maxkamaddu waxay siin kartaa qofka lacagta lagu leeyahay Dacwad & Amar Waraysi, Foomka 252 A ama B.

Waraysu waxaa weeye su'aalo qoraal ah oo la ogolaaday oo ruuxa lacagta lagu leeyahay looga baahan yahay inuu ka jawaabo.

d) Akhri "JDF 82 - Tilmaamaha Xukunka Uruurinta Lacagta" wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan deynta la soo ururiyo.

## 3. Kharashka

Kharashka Xaraynta Waxay ku xidhan tahay xadiga sheegashada:

| Xadiga La Sheegtay | Cabasho | Jawaabta | Jawaabta & Dacwada Dhanka Kale |
|---|---|---|---|
| $500 ama ka yar | $31 | $26 | $31 |
| In ka badan $500 | $55 | $41 | $46 |

Kharashka Koobiga $0.25 boggiiba.

Si Aad u Codsato Ka Dhaafid Kharash:

- ☐ JDF 205 - Codsiga Ka Dhaafidda Kharashka.
- ☐ JDF 206 - Amar. (Kaliya samee macluumaadka kiiska.)

Haddii aad hesho kaalmooyin cayiman oo dadweynaha ah, waxaad si toos ah ugu qalmi kartaa kharashka ka cafiska. Markaas isticmaal:

- ☐ JDF 209 - Ogeysiiska Ka-Dhaafista Kharashka.

## 4. Dhamaan Foomamka

www.courts.state.co.us/Forms

JDF 250 AH – Wargelinta Sheegashooyinka Yaryar, Sheegashada iyo Yeedhmada.

Foomamka Sida Loogu Baahdo:

JDF 75 - Shuruudaha.
JDF 76 – Dacwad Guud
JDF 81 - Jawaabta Guud
JDF 254 - Yeedhmo.

## 5. Macluumaadka ADA

Si aad u hesho qaabilaad macquul ah oo hoos yimaada Xeerka Maraykanka ee Naafada la xiriir iskuduwaha ADA ee maxkamaddaada.

## 6. La-taliyaha Sharci

Kuwani waa tilmaamo aasaasi ah oo kaliya macluumaad ahaan loogu talogalay. Maaha talo sharci. Hadii aad doorato in aad naftaada matasho, waxa ku qabanaya shuruuc iyo nidaam la mid ah kuwa looyarka qabta. Hadii aanad fahmin macluumaadkan, fadlan la xidhiidh looyar.

## 7. Tibaaxaha Caamka ah

| | |
|---|---|
| Macluumaadka Kiiska | Sanduuqyada qaybta kore ee foomka ku yaalla. Waxaa ku jira cinwaanka maxkamadda, magacyada dhinacyada, macluumaadka xidhiidhka ee dacwad xareeyaha, iyo lambarka kiiska. |
| Eedeysane | Ruuxa ka jawaaba kiiska. |
| Dhibbane | Ruuxa bilaabay kiiska. |
| Farriin-qaade | Qof (aan adiga ahayn) oo qaada waraaqaha maxkamadda. Gaadhsiintan waxay u sheegtaa qofka in uu si rasmi ah qayb uga yahay kiiska iyo talaabada xigta ee ay tahay inuu qaado. |
| Jawaabta | Dokumentiyada uu ku sheego Eedeysanuhu haddii sheegashooyinka iyo xaqiiqadu ay run yihiin ama been yihiin. |
| Yeedhmo | Dokumenti ay soo saartay maxkamadda ama qareenka ruqsada haysta, kaas oo Eedeysanaha u sheega xilliga dhageysiga uu yahay, loona baahan yahay tallaabooyinka xiga ee hawsha kiiska. |